



# Xeelada Amniga Qaranka Koowaad ee Aotearoa New Zealand

Si loo helo qaran ammaan iyo adkeysii badan

## Waxaan rabnaa aragtidaada amniga qaranka

Dowladda ayaa ka shaqeyneyso Xeelada Amniga Qaranka Koowaad ee Aotearoa New Zealand.

Si aan gacan uga geysanno hormarinta Xeeladaan, waxaan rabnaa in aan maqalno fikradahaaga iyo afkaaraha ku saabsan qaabka fog ee Amniga Qaranka.

## Waa maxay amniga qaranka oo maxay muhiim u tahay

Fikradda amniga qaranka ee New Zealand waxay diirada saarayaan ka illaalinta New Zealand halisaha xaasidnimada leh ee ka imaanaya kuwa waxyeello noo geysan lahaa. Amniga qaranka wuxuu gacan ka geystaa faydo qabka dadka reer New Zealand, oo waxay ku lugleedahay ka shaqeynta lagu aqoonsanayo, yareynta iyo ka jawaabida halisaha saameysa New Zealand iyo dadka reer New Zealand oo ay ku jiraan:

- Argagixisanimada iyo xagjirnimada rabshadaha wata ee nooc walba
- Faragelinta wadan kale uu ku hayo dimuquraadiyadeena (tusaale ahaan iyagoo si qarsoodi ah u saameynta habraaceena doorashada iyo go'aamada codeynta)
- Dhacdooyinka internetka ee saameeya shabakadaha kumbuyuutarka muhiimka ah (tusaale qasaaraha helitaanka akoonada

bangiga, soo saarista xogta, ama carqaladeynta saadka korontada)

Nabadgelyada qaranka ayaa sidoo kale ku saabsan fursadaha aan ku wada shaqeyno si aan u hormarino danaha amniga qaranka New Zealand.

## Xaaladeena iyo waayo aragnimada dal ahaan ayaa isbedelay

Wargelinta Guddiga Royal ee Su'aal weydiinta weerarka masaajidka Christchurch ayaa sameeyay 44 tallooyin oo ay Dowlada mabd'a ahaan aqbashay.

Warbixinta ayaa hoosta ka xariiqday baahida fama hogaaminta adag iyo jaheynta amniga qaranka, oo ay ku jiraan ku talinta wakaalada amniga qaranka ee cusub. Waxaa kaloo ay tilmaamtay muhiimada go'aan gaaris la xisaabtan leh, iyo wadahalada dadweynaha kordhay ee arimaha amniga qaranka.

Hal qaab oo lagu dhaqan geliyo ujeeddada Wargelinta Su'aal weydiinta Guddiga Royal waa in loo maraa Xeelada Amniga Qaranka.

Fogaanteena juqraafiyeed iyo cabirka yar markale nagama ilaaliyo sidii ay beri hore ahaayeen. New Zealand waxay wajaheysaa caqabado korayo ee aminiga, oo waxaan u baahannahay inaan wax ka qabano xili hore si aan u aqoonsano, oo aan uga hortagno iyo u yareyno halisahaan.

Xeeladaha Amniga Qaranka ayaa naga caawinayo inaan gaarno midaan oo aan abuurno New Zealand amni iyo adkeysii badan.



## Ka wada shaqeynta lagu illaalinayo oo lagu hormarinayo amnigeena qaran

Xeeladaha waxay diirada saarayaan halisaha amniga qaranka – labadana hadda iyo mustaqbalka.

Waxay tilmaameysaa danaheena amniga qaranka, aqoonsato caqabadaha hadda iyo mustaqbalka oo waxay qeexdaa aagaga mudnaanta ee qaabeynta nidaamka iyo maalgashiga.

Xeelada waxay dejineysaa qorshe ku saabsan sida aan ula wada shaqeyn karno jaalalka Te Tiriti o Waitangi, bulshooyinka, waaxda gaarka ah iyo jaalalka caalamiga ah.

Xeeladaha waxay:

- Hubinayaan in New Zealand ay u sameeyn karto dooqyada amniga qaranka ee wadanka
- U muuji ballanqaad ku aadan Te Tiriti o Waitangi oo aqoonso doorka Māori ee amniga qaranka
- Aqoonso muhiimada Baasifiga iyo isku xirka qotoda dheer ee u dhexeeya NewZealand iyo gobolka.

Hormarinta Xeelad ayaa sidoo kale ah fursad lagu yeesho wadahadal dadweyne ee ku saabsan amniga qaranka iyo qaab dhismeedka taageera midaan.

## Waxaad haysataa fursada lagu qaabeynayo Xeelada koowaad ee Amniga Qaranka

Waxaa kuu suurto galeyso inaad jawaab celin ka bixisid Xeelada illaa 9 Oktoobar 2022 oo loo marayo habraaca gudbinada onleenka iyo onleenka hui.

Jawaab celintaada waxay dhiseysaa waxa aan horaan uga maqalnay dadweynaha iyada oo loo marayo howlgalada kale ee dhawaan ee amniga qaranka, oo ay ku jiraan Xog wareysiga Aragtida Muddada fog ee Amniga Qaranka.

Xeelada Amniga Qaranka ayaa ku dhaqaaqayo habeynada lagu taliyay ee Wargelinta Guddiga Royal ee xeerka ku jiro.

Waxaan fileynaa in Xeelada la soo gabagabeeyo bartamaha 2023.

### Sida loo ogaado wax badan

Waxaad ka heli kartaa warbixin ku saabsan Xeelada iyo sida loogu sameeyo gudbinta onleenka websaydka DPMC [National Security Strategy](#).

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan jawaabta Dowladda ee Wargelinta Su'aal weydiinta Guddiga Royal arag [Su'aal weydiinta Guddiga Royal ee weerarka argagaxisada ee masjidka Christchurch | Gollaha Ra'isalwasaaraha iyo Wasiirada \(DPMC\)](#)

